6. That all state, county, or local agencies with information or records relevant to the child's situation, including any public or private medical or mental health treatment resources and all educational facilities, shall release such information or records as are necessary for the management of this case to the Department of Children's Services and to its agents.

7. It is further ordered

ENTER this the 24th day of June, 2022,
at 4:06 AM/PM


JUDGE/MAGISTRATE

PREPARED BY:


Elizabeth Smith, BPR #016913
Associate Counsel
Department of Children's Services
2600 Western Ave
Knoxville, TN 37921

Dawladda Tennessee
MAXKAMADDA DHALLINYARADA EE DEGMADA KNOX
Charles D. Susano III, Xoghayaha Maxkamadda

Dawladda Tennessee,
Waaxda Adeegyada Carruurta,

Codsade
iyo

Ahmed Isse,

Dacwoode

Kiiska la xiriira: Stacy Mimo Niyizigama, Taariikhda Dhalashada: 16 Disembar 2014

WARGELIN

Ku Ahmed Isse:

Waxaa lagu ogeysiinayaa oo lagugu amrayaa in aad soo gudbiso Jawaab Qoran oo ku saabsan Codsiga Lagu Joojinayo Xuquuqda Waalidnimo, kaas oo halkan lagu soo gudbiyey. Waa in aad Jawaabtaada ku soo hagaajisaa Xoghayaha Maxkamadda Dhallinyarada ee Degmada Knox, oo ku taalla 3323 Division Street, Knoxville, Tennessee, 37919, muddo soddon (30) maalmood gudaheed laga bilaabo maalinta aad hesho wargelintan, iyada oo aan la tirin maalinta lagu keenay, sidoo kale, waa in aad nuqul ka mid ah Jawaabtaada u gudbisaa Claudia Robinson, oo ah qareenka Waaxda Adeegyada Carruurta kuna sugan Qaybta Sharciga DCS, 2600 Western Avenue, Knoxville, Tennessee, 37921. Haddii aad sidaas samayn weydo, haddii aad ku guuldareysatid inaad sidaas sameyso, xukun kama dambays ah ayaa lagugu qaadi karaa gargaarka lagu dalbaday codsiga waxaana laga yaabaa in la joojiyo xuquuqdaada waalidnimo.

CHARLES D. SUSANO III

Xoghayaha Maxkamadda

La soo saaray 1-da Disember, 2023.

Waxaa soo saaray:


Ku-xigeenka Xoghayaha Maxkamadda

DIB U CELIN

Waxaan caddeynayaa in aan gudbiyay Wargelinta ee ku xusan dokumentigan maalinta _____ ee bisha _____, 2023, anigoo nuqul ka mid ah Wargelinta, Ogeysiiska, iyo Codsiga Lagu Joojinayo Xuquuqda Waalidnimo si shaqsi ah ugu gudbiyey Dacwoodaha goobta:

ama iyadoo la adeegsanayo _____

Adeeg-bixiyaha Gaarka ah ee Geeya Wargelinta



ADA
WIXII CAAWIMO AH WAC:
865 / 215-4437

Elizabeth.Golem@knoxcounty.org

MAXKAMADDA DHALLINYARADA EE DEGMADA COURT

**DAWLADDA TENNESSEE
WAAXDA ADEEGYADA CARRUURTA**

CODSADE

iy

AHMED ISSE

DACWOODYAASHA

KIISKA LA XIRIIRA:

**Stacy Mimo Niyizigama, Taariikhda Dhalashada: 16 Disember 2014
ILMO KAAS OO KA YAR SIDDEEDYO TOBAN (18) SANO**

Lambarka. _____

**LA DIWANGELIYAY
CHARLES D. SUSANO III
XOGHAYAHA MAXKAMADDA
MAXKAMADDA DEGMO WEYNAAH KNOX
MAXKAMADDA MADANIGA AH
IYO MAXKAMADDA DHALLINYARADA
1-da Disember, 2023 10:28 Subaxnimo (AM)**

CODSIGA LAGU JOOJINAYO XUQUUQDA WAALIDNIMO

Codsigan, oo ay gudbisay Dawladda Tennessee, Waaxda Adeegyada Carruurta ("DCS"), iyada oo loo marayo wakiilkeeda si rasmi ah loogu xilsaaray, Vonda Michael, wuxuu codsanayaa amar lagu joojinayo xuquuqda waalidnimo ee Dacwoodaha, Ahmed Isse, ee la xiriirta ilmaha Stacy Mimo Niyizigama. Iyadoo lagu taageerayo codsigan, Waaxdu waxay maxkamadda u soo bandhigi doontaa qodobada soo socda:

1. Amarka la codsanayo wuxuu si rasmi ah ugu goynayaa dhammaan xuquuqaha, waajibaadyada, iyo masuuliyadaha Dacwoodaha ku leeyahay ilmaha la xusay, haddii ay jiraan, wuxuuna sidoo kale meesha ka saarayaa dhammaan xuquuqaha iyo waajibaadyada ilmaha ee la xiriira Dacwoodaha, kuwaas oo ka soo baxaya xiriirka waalidnimo. Amarka la codsanayo wuxuu ilmaha ku wareejinayaa daryeelka iyo mas'uuliyadda Dawladda Tennessee, taasoo siineysa xaq ah in ay ilmaha u raadiso qoys korsanaya iyo in ay ogolaato korsasho kasta oo suurtagal ah. Haddii amarku la bixiyo, Dacwooduhu ma yeelan doono wax xaq ah oo uu ugu helo ogeysiis la xiriira habraaca korsashada ilmaha, ma lahaan doono wax xaq ah oo uu ku diido korsashada ilmaha, mana yeelan doono wax xiriir ah, sifo sharci ah ama si kale, oo uu la leeyahay ilmaha.

2. Taariikh nololeedka caafimaad iyo bulshada ee ilmaha iyo qoyska dhalay ilmaha ayaa la dhamaystiray ilaa iyo inta suurtagal ah, sida uu farayo T.C.A. § 36-1-111(j).

I. XUQUUQDA MAXKAMADDA IYO GOOBTA DHAGAYSIGA

1. Maxkamaddan waxay leedahay awood sharciyeed oo ay ku maamusho kiiskan, sida ku cad T.C.A. §§ 36-1-113, 37-1-104, iyo 37-1-147.

2. Goobtu waxay ku haboontahay Degmada Knox iyadoo la raacayo T.C.A. §§ 36-1-113(c)(4) iyo -114, iyo 37-1-111, maadaama ilmaha uu yahay daryeelka Dawladda Tennessee, Waaxda Adeegyada Carruurta, Xafiiska Degmada Knox, isla markaana uu hoos yimaado awoodda sharciyeed ee Maxkamadda Dhallinyarada ee Degmada Knox.

3. Sida uu farayo Xeerka Midaysan ee Xakamaynta iyo Dhaqangelinta Xukunka Xannaanada Carruurta (Uniform Child Custody and Jurisdiction Enforcement Act), T.C.A. §§ 36-6-201 – 243, DCS waxay caddeynaysaa in aysan ka qaybgalin wax dacwad kale ah oo la xiriira xannaanada ilmaha, in DCS aysan ogeyn wax dacwad kale ah oo saameyn ku yeelan karta arrintan, iyo in DCS aysan ogeyn wax qof kale ah oo aan ahayn dhinacyada kiiskan oo haysta ilmaha ama sheeganaya xuquuq sharci ah oo xannaano ama booqasho la xiriirta ee ilmaha, marka laga reebo wixii si gaar ah loogu xusay codsigan.

II. XEER-BIXIYAASHA

Codsaduhu wuxuu tixraacayaa dhammaan cutubyadii hore ee dokumentigan, wuxuuna intaas ku darayaa sheegashooyinka soo socda:

1. Codsaduhu waa daryeelaha hadda haya ilmaha. Stacy Niyizigama waxaa laga qaaday hooyadeed waxaana loo wareejiyey eedadeed dhanka hooyada sannadkii 2017. Waxaa la geliyey daryeelka korsashada 31-kii Janaayo, 2019, kadibna waxaa dib loogu wareejiyey eedadeed sannadkii 2020, kaddib markii uu fashilmay isku day lagu doonayey in lagu celiyo hooyadeed. Stacy waxay markale ku noqotay daryeelka korsashada 24-kii Juun, 2022, waxaana ay halkaas joogtay si aan kala go' lahayn ilaa iyo waqtigan. Maxkamadda Dhallinyarada ee Degmada Knox waxay ilmaha u aqoonsatay mid dhibaato la kulmay 22-kii Ogoosto, 2023.

2. Ilmaha, Stacy Mimo Niyizigama, waxaa dhashay Rose Niyizigama 16-kii Disember, 2014, magaalada Chattanooga, Tennessee. Hooyadu waxay magacawday Ahmed Isse inuu yahay aabbaha ilmahan.

3. Nuqul ka mid ah shahaadada dhalashada ee ilmaha ayaa lagu lifaaqay.
4. Dacwoodaha, Ahmed Isse, waxaa la aaminsan yahay inuu ku sugan yahay Afrika. Waxaana loo masaafuriyey Afrika, waxaana ay ayeeyada aabbaha dhashay xaqiijisay inuu halkaas joogo.
5. Dawladdu waxay la tashatay diwaanka aabbaha la tuhunsan yahay ee Dawladda Tennessee, sida uu farayo T.C.A. § 36-1-113(d)(3)(A)(i). Kadib la-tashiga, waxaa la ogaaday in aysan jirin wax sheegasho ah oo ku saabsan aabbaha ilmahan ee ku qoran diiwaanka. Sidoo kale, wax sheegasho kale oo la xiriira aabbennimada ma jiraan.
6. Qareen Adam Moncier ayaa loo magacaabay inuu noqdo wakiilka sharci ee ilmaha (guardian ad litem).

ASALKA KOOWAAD
KU GUULDARAYSTAY INUU CADDEYO AMA FULIYO AABBE-NIMADA
T.C.A. §§ 36-1-113(g)(9) iyo 36-1-117(c)

1. Sida uu farayo Tennessee Code Annotated §§ 36-1-102(29), 36-1-102(44), 36-1-113(g)(9), iyo 36-1-117(c), waqtiga la gudbiyey codsiga lagu joojinayo xuquuqda waalidnimo, Dacwoodaha, Ahmed Isse, ma ahayn “waalid sharci ah” oo ilmaha yar, sida lagu qeexay T.C.A. § 36-1-102(29). Sida uu dhigayo T.C.A. § 36-1-102(44) iyo T.C.A. § 36-1-117(c), marka la gudbiyey codsiga joojinta waalidnimada, Dacwoodaha waxa uu ahaa “aabe la tuhunsan yahay” ee ilmaha yar.
2. Dacwoodaha Ahmed Isse ma uusan sharciyeyn ilmaha.
3. Dacwoodaha Ahmed Isse waxa uu ku guuldaraystay, iyada oo aan jirin sabab macquul ah ama cudurdaar, inuu si joogto ah oo macquul ah u bixiyo lacagaha naf-lacaariga carruurta.
4. Dacwoodaha Ahmed Isse waxa uu ku guuldaraystay inuu raadsado booqasho macquul ah oo uu la yeesho ilmaha.
5. Dacwoodaha Ahmed Isse waxa uu ku guuldaraystay inuu muujiyo rabitaan iyo karti uu ilmaha mas'uuliyaddiisa uu ku qaado.
6. Dacwoodaha Ahmed Isse waxa uu ku guuldaraystay inuu gudbiyo codsi rasmi ah oo ku saabsan aabbennimada kadib markii la ogeysiiyey, sida uu farayo xeerka diiwaangelinta.
7. Haddii mas'uuliyadda ilmaha lagu wareejiyo Dacwoodaha Ahmed Isse, waxay khatar weyn ku keeni kartaa daryeelka jir ahaaneed iyo maskaxeed ee ilmaha.

DANTA UGU WANAAGSAN EE ILMAHA (BEST INTEREST)
T.C.A. § 36-1-113(i)

Codsaduhu wuxuu tixraacayaa dhammaan cutubyadii hore ee dokumentigan, wuxuuna intaas ku darayaa sheegashooyinka soo socda:

Waaxda Adeegyada Carruurta waxay soo bandhigi doontaa in, ka dib marka la caddeeyo in ay jiraan sababo sharci ah oo lagu joojinayo xuquuqda waalidnimo ee Dacwoodaha, ay tahay in Maxkamaddu ay falanqeyso haddii ay dani ugu jirto ilmaha in xuquuqda waalidnimada la joojiyo. DCS waxay intaa ku daraysaa in liiska arimaha lagu qiimeeyo danta ugu wanaagsan ee ilmaha, oo aan ahayn mid xaddidan (nonexclusive list), uu ku qeexan yahay Tennessee Code Annotated § 36-1-113(i), kuwaas oo ay tahay in Maxkamaddu tixgeliso.

1. Waaxda Adeegyada Carruurta waxay soo bandhigi doontaa in arrinta ku xusan T.C.A. § 36-1-113(i)(1)(A) ay khuseyso kiiskan. Sidaas darteed, DCS waxay caddeynaysaa in danta ugu wanaagsan ee ilmaha ay ku jirto in la joojiyo xuquuqda waalidnimo ee Dacwoodaha, maadaama joojinta xuquuqda waalidnimo ay si toogan u saameyn doonto baahida muhiimka ah ee ilmaha ee xasillooni iyo joogtaynta goobtiisa daryeelka inta uu weli ka yar yahay qaan-gaarnimada. Ilmaha waxaa la dejiyay guriga walaalaheed, waxaana qoyska daryeelaya ay muujiyeen rabitaan ay ilmaha ku korsanayaan haddii la helo oggolaanshaha korsashada. Waalidiinta daryeelaya waxay si joogto ah u daboolaan baahiyaha maalinlaha ah iyo baahiyaha khaaska ah ee ilmaha. Sidaa darteed, DCS waxay caddeynaysaa in qodobkan uu si buuxda u taageerayo joojinta xuquuqda waalidnimo ee Dacwoodaha.

2. Waaxda Adeegyada Carruurta waxay soo bandhigi doontaa in arrinta ku xusan T.C.A. § 36-1-113(i)(1)(B) ay khuseyso kiiskan. Sidaas darteed, DCS waxay caddeynaysaa in danta ugu wanaagsan ee ilmaha ay ku jirto in la joojiyo xuquuqda waalidnimo ee Dacwoodaha, maadaama bedelidda daryeelayaal iyo deegaanka jirka ee ilmaha ka soo bilaabmay guriga hadda ay joogto uu saameyn taban ku yeelan karo xaaladda nafsaani, maskaxeed, iyo/ama caafimaad ee ilmaha. Waalidiinta daryeelaya waxayna awoodaan inay daboolaan baahiyaha joogtada ah ee ilmaha. Sidaa darteed, DCS waxay caddeynaysaa in qodobkan uu si buuxda u taageerayo joojinta xuquuqda waalidnimo ee Dacwoodaha.

3. Waaxda Adeegyada Carruurta waxay soo bandhigi doontaa in arrinta ku xusan T.C.A. § 36-1-113(i)(1)(C) ay khuseyso kiiskan. Sidaas darteed, DCS waxay caddeynaysaa in danta ugu wanaagsan ee ilmaha ay ku jirto in la joojiyo xuquuqda waalidnimo ee Dacwoodaha, maadaama waalidku uusan soo bandhigin xasillooni iyo joogtaynta daboolidda baahiyaha aasaasiga ah ee ilmaha, oo ay ka mid yihiin baahiyaha nololeed, waxbarasho, hoy, iyo ammaan. Sidaa darteed, DCS waxay caddeynaysaa in qodobkan uu si buuxda u taageerayo joojinta xuquuqda waalidnimo ee Dacwoodaha.

4. Waaxda Adeegyada Carruurta (DCS) waxay soo bandhigi doontaa in arrinta ku xusan T.C.A. § 36-1-113(i)(1)(D) ay khuseyso kiiskan. Sidaas darteed, DCS waxay caddeynaysaa in danta ugu wanaagsan ee ilmaha ay ku jirto in la joojiyo xuquuqda waalidnimo ee Dacwoodaha, maadaama waalidka iyo ilmaha aysan lahayn xiriir sugan oo caafimaad qaba oo waalidnimo. Intaa waxaa dheer, lama filayo in waalidku awoodo inuu abuuro xiriir noocaas ah. Dacwooduhu ma booqdo ilmaha, mana jiro dadaal uu ugu jiro dhisidda xiriir waalidnimo. Sidaa darteed, DCS waxay caddeynaysaa in qodobkan uu si buuxda u taageerayo joojinta xuquuqda waalidnimo ee Dacwoodaha.

5. Waaxda Adeegyada Carruurta (DCS) waxay soo bandhigi doontaa in arrinta ku xusan T.C.A. § 36-1-113(i)(1)(E) ay khuseyso kiiskan. Sidaas darteed, DCS waxay caddeynaysaa in danta ugu wanaagsan ee ilmaha ay ku jirto in la joojiyo xuquuqda waalidnimo ee Dacwoodaha, maadaama waalidku uusan si joogto ah u sameyn booqashooyin la xiriira ilmaha. Sidaa darteed, DCS waxay caddeynaysaa in qodobkan uu si buuxda u taageerayo joojinta xuquuqda waalidnimo ee Dacwoodaha.

6. Waaxda Adeegyada Carruurta waxay soo bandhigi doontaa in arrinta ku xusan T.C.A. § 36-1-113(i)(1)(F) ay khuseyso kiiskan. Sidaas darteed, DCS waxay caddeynaysaa in danta ugu wanaagsan ee ilmaha ay ku jirto in la joojiyo xuquuqda waalidnimo ee Dacwoodaha, maadaama ilmaha, Stacy Niyizigama, ay ka baqayso in dib loogu celiyo guriga waalidka. Sidaa darteed, DCS waxay caddeynaysaa in qodobkan uu si buuxda u taageerayo joojinta xuquuqda waalidnimo ee Dacwoodaha.

7. Waaxda Adeegyada Carruurta (DCS) waxay soo bandhigi doontaa in arrinta ku xusan T.C.A. § 36-1-113(i)(1)(G) aanay khuseyn kiiskan, mana taageerayso mana diidayso joojinta xuquuqda waalidnimo. Waaxda Adeegyada Carruurta ma hayso wax macluumaad ah oo muujinaya in guriga Dacwoodaha uu sababi karo ama uga dari karo ilmaha wixii waayo-aragnimo ah ee la xiriira trauma ama calaamadaha la xiriira dhibaataadii hore.

8. Waaxda Adeegyada Carruurta waxay soo bandhigi doontaa in arrinta ku xusan T.C.A. § 36-1-113(i)(1)(H) ay khuseyso kiiskan. Sidaas darteed, DCS waxay caddeynaysaa in danta ugu wanaagsan ee ilmaha ay ku jirto in la joojiyo xuquuqda waalidnimo ee Dacwoodaha, maadaama ilmaha uu sameystay xiriir waalidnimo oo caafimaad qaba oo lala yeeshay qof kale ama dad kale, iyadoo waalidku uusan jirin. Ilmuhu wuxuu si wanaagsan ugu xiran yahay waalidiinta daryeelaya. Sidaa darteed, DCS waxay caddeynaysaa in qodobkan uu si buuxda u taageerayo joojinta xuquuqda waalidnimo ee Dacwoodaha.

9. Waaxda Adeegyada Carruurta waxay soo bandhigi doontaa in arrinta ku xusan T.C.A. § 36-1-113(i)(1)(I) ay khuseyso kiiskan. Sidaas darteed, DCS waxay caddeynaysaa in danta ugu wanaagsan ee ilmaha ay ku jirto in la joojiyo xuquuqda waalidnimo ee Dacwoodaha, maadaama ilmaha uu leeyahay xiriir shucuur leh oo muhiim ah oo uu la leeyahay dad kale oo aan ahayn waalidka ama daryeelayaasha, oo ay ka mid yihiin walaalaha dhalashada ama kuwa la korsaday, islamarkaana joojinta xuquuqda waalidnimo aysan si taban u saameyn doonin helitaanka ilmaha ee macluumaadka la xiriira asal ahaan qoyska iyo dhaxalkiisa. Ilmuhu wuxuu hadda la nool yahay walaalihiis. Sidaa darteed, DCS waxay caddeynaysaa in qodobkan uu si buuxda u taageerayo joojinta xuquuqda waalidnimo ee Dacwoodaha.

10. Waaxda Adeegyada Carruurta (DCS) waxay soo bandhigi doontaa in arrinta ku xusan T.C.A. § 36-1-113(i)(1)(J) aanay khuseyn kiiskan, mana taageerayo mana diidayso joojinta xuquuqda waalidnimo. Waaxda Adeegyada Carruurta ma hayso wax macluumaad ah oo la xiriira fal dambiyeed ama adeegsiga iyo/ama ku xadgudubka maandooriyaha ee guriga Dacwoodaha taasoo ka dhigi karta mid aan si joogto ah ugu filnaan karin daryeelka ilmaha si nabdoon oo xasilloon.

11. Waaxda Adeegyada Carruurta waxay soo bandhigi doontaa in arrinta ku xusan T.C.A. § 36-1-113(i)(1)(K) ay khuseyso kiiskan. Sidaas darteed, DCS waxay caddeynaysaa in danta ugu wanaagsan ee ilmaha ay ku jirto in la joojiyo xuquuqda waalidnimo ee Dacwoodaha, maadaama waalidku uusan ka faa'iidayaan barnaamijyada, adeegyada, ama kheyraadka bulshada ee loo heli karo si uu u sameeyo isbedel joogto ah oo la xiriira duruufiisa, dhaqankiisa, iyo/ama xaaladdiisa nololeed. Sidaa darteed, DCS waxay caddeynaysaa in qodobkan uu si buuxda u taageerayo joojinta xuquuqda waalidnimo ee Dacwoodaha.

12. Waaxda Adeegyada Carruurta waxay soo bandhigi doontaa in arrinta ku xusan T.C.A. § 36-1-113(i)(1)(L) ay khuseyso kiiskan. Sidaas darteed, DCS waxay caddeynaysaa in danta ugu wanaagsan ee

ilmaha ay ku jirto in la joojiyo xuquuqda waalidnimo ee Dacwoodaha, maadaama Waaxdu ay sameysay dadaal macquul ah oo ay ku caawineyso waalidka si uu u sameeyo isbeddel joogto ah oo la xiriira hab-dhaqankiisa ama duruufahiisa nololeed, hase yeeshee, inkasta oo dadaalladaas la sameeyay, waalidku ma sameynin wax isbeddel ah oo ku saabsan hab-dhaqankiisa ama qaab nololeedkiisa. Sidaa darteed, DCS waxay caddeynaysaa in qodobkan uu si buuxda u taageerayo joojinta xuquuqda waalidnimo ee Dacwoodaha.

13. Waaxda Adeegyada Carruurta waxay soo bandhigi doontaa in arrinta ku xusan T.C.A. § 36-1-113(i)(1)(M) ay khuseyso kiiskan. Sidaas darteed, DCS waxay caddeynaysaa in danta ugu wanaagsan ee ilmaha ay ku jirto in la joojiyo xuquuqda waalidnimo ee Dacwoodaha, maadaama waalidku uusan muujin wax dadaal degdeg ah oo uu kaga shaqeynayo wax ka qabashada duruufaha, hab-dhaqanka, ama xaaladaha nololeed ee sababay in la go'aamiyo in ilmaha lagala wareego daryeelkiisa, maadaama ay u muuqdeen kuwo khatar ku ah badqabkiisa iyo dantiisa ugu wanaagsan. Sidaa darteed, DCS waxay caddeynaysaa in qodobkan uu si buuxda u taageerayo joojinta xuquuqda waalidnimo ee Dacwoodaha.

14. Waaxda Adeegyada Carruurta waxay soo bandhigi doontaa in arrinta ku xusan T.C.A. § 36-1-113(i)(1)(N) ay khuseyn kiiskan. Sidaas darteed, DCS waxay caddeynaysaa in danta ugu wanaagsan ee ilmaha ay ku jirto in la joojiyo xuquuqda waalidnimo ee Dacwoodaha, maadaama waalidku uu muujiyey dayacaad (neglect) ku aaddan ilmaha. Sidaa darteed, DCS waxay caddeynaysaa in qodobkan uu si buuxda u taageerayo joojinta xuquuqda waalidnimo ee Dacwoodaha.

15. Waaxda Adeegyada Carruurta waxay soo bandhigi doontaa in arrinta ku xusan T.C.A. § 36-1-113(i)(1)(O) ay khuseyso kiiskan. Sidaas darteed, DCS waxay caddeynaysaa in danta ugu wanaagsan ee ilmaha ay ku jirto in la joojiyo xuquuqda waalidnimo ee Dacwoodaha, maadaama waalidku uusan weligiis siinin ilmaha daryeel ammaan ah oo xasilloon. Sidaa darteed, DCS waxay caddeynaysaa in qodobkan uu si buuxda u taageerayo joojinta xuquuqda waalidnimo ee Dacwoodaha.

16. Waaxda Adeegyada Carruurta waxay soo bandhigi doontaa in arrinta ku xusan T.C.A. § 36-1-113(i)(1)(P) ay khuseyso kiiskan. Sidaas darteed, DCS waxay caddeynaysaa in danta ugu wanaagsan ee ilmaha ay ku jirto in la joojiyo xuquuqda waalidnimo ee Dacwoodaha, maadaama waalidku uusan muujin wax faham ah oo ku saabsan baahiyaha aasaasiga ah iyo kuwa khaaska ah ee ilmaha looga baahan yahay si uu ugu noolaado nolol wanaagsan. Dacwooduhu ma sameeyo wax booqasho ah oo uu ilmaha la yeesho. Sidaa darteed, DCS waxay caddeynaysaa in qodobkan uu si buuxda u taageerayo joojinta xuquuqda waalidnimo ee Dacwoodaha.

17. Waaxda Adeegyada Carruurta waxay soo bandhigi doontaa in arrinta ku xusan T.C.A. § 36-1-113(i)(1)(Q) ay khuseyso kiiskan. Sidaas darteed, DCS waxay caddeynaysaa in danta ugu wanaagsan ee ilmaha ay ku jirto in la joojiyo xuquuqda waalidnimo ee Dacwoodaha, maadaama waalidku uu ku guuldaraystay inuu muujiyo karti iyo dadaal joogto ah oo lagu abuuri lahaa guri daboolaya baahiyaha aasaasiga ah iyo kuwa khaaska ah ee ilmaha, guri uu ilmuhu si nabad ah ugu kori karo nolol wanaagsan. Sidaa darteed, DCS waxay caddeynaysaa in qodobkan uu si buuxda u taageerayo joojinta xuquuqda waalidnimo ee Dacwoodaha.

18. Waaxda Adeegyada Carruurta (DCS) waxay soo bandhigi doontaa in arrinta ku xusan T.C.A. § 36-1-113(i)(1)(R) aanay khuseyn kiiskan, mana taageerayso mana diidayso joojinta xuquuqda waalidnimo. Waaxda Adeegyada Carruurta ma hayso wax macluumaad ah oo la xiriira deegaanka jir ahaaneed ee guriga Dacwoodaha iyo haddii uu yahay mid caafimaad qaba oo ammaan u ah ilmaha.

19. Waaxda Adeegyada Carruurta waxay soo bandhigi doontaa in arrinta ku xusan T.C.A. § 36-1-113(i)(1)(S) ay khuseyso kiiskan. Sidaas darteed, DCS waxay caddeynaysaa in danta ugu wanaagsan ee ilmaha ay ku jirto in la joojiyo xuquuqda waalidnimo ee Dacwoodaha, maadaama waalidku uu ku guuldaraystay inuu si joogto ah u bixiyo taageero dhaqaale oo ka badan mid macno yar leh oo loogu talagalay ilmaha. Sidaa darteed, DCS waxay caddeynaysaa in qodobkan uu si buuxda u taageerayo joojinta xuquuqda waalidnimo ee Dacwoodaha.

20. Waaxda Adeegyada Carruurta (DCS) waxay soo bandhigi doontaa in arrinta ku xusan T.C.A. § 36-1-113(i)(1)(T) aanay khuseyn kiiskan, mana taageerayso mana diidayso joojinta xuquuqda waalidnimo. Waaxda Adeegyada Carruurta ma hayso wax macluumaad ah oo la xiriira xuquuqda maskaxeed ama shucuureed ee Dacwoodaha iyo haddii uu leeyahay karti uu ilmaha ugu adeego waalid ahaan.

Iyadoo la tixraacayo xaqiiqooyinka iyo doodaha sharciga ee kor ku xusan, **CODSADUHU WUXUU CODSANAYAA:**

1. In Dacwoodaha lagu wargaliyo nuqul ka mid ah codsigan oo loogana baahanyahay inuu kasoo muuqdo maxkamadda isla markaana uu bixiyo jawaab rasmi ah.

2. In, kadib marka la dhagaysto dacwadda, Maxkamaddu soo saarto xukun rasmi ah oo si joogto ah u joojinaya dhammaan xuquuqaha waalidnimo ee Dacwooduhu ku lahaa ilmaha la xusay; iyadoo la caddeynayo in Dacwooduhu aanu yeelan doonin wax xaq ah oo uu ugu helo ogeysiis la xiriira habraaca korsashada ilmaha, wax xaq ah oo uu ku diido korsashada ilmaha, ama wax xiriir ah, sharci ahaan ama si kale, oo uu la yeesho ilmaha. Sidoo kale, in mas'uuliyadda, xakamaynta, iyo daryeelka buuxa ee ilmaha lagu wareejiyo Waaxda Adeegyada Carruurta (DCS), iyada oo la siinayo xaq ah inay ilmaha u raadiso qoys korsanaya iyo inay ogolaato korsasho kasta oo suurtagal ah, iyadoo u dhaqmeysa sidii waalid rasmi ah (*in loco parentis*).

3. In Maxkamaddu ay bixiso wixii gargaar dheeri ah, guud iyo gaar ah, ee lagama maarmaan u ah cadaaladda kiiskan.



Vonda Michael, Maareeyaha Kiiska
Waaxda Adeegyada Carruurta

Douglas E. Dimond
Claudia Robinson, Robert W. Rogers
Elizabeth Smith, Christine L. Muirgaen
Tyler B. Combs, Amanda Butcher
Emily Mullins

QAREENNADA SHAQAALAHA, DAWLADDA
WAAXDA ADEEGYADA CARRUURTA

Claudia Robinson, BPR #025267
Xeer-ilaaliyaha Guud ee Gobolka
Waaxda Adeegyada Carruurta
2600 Western Avenue
Knoxville, Tennessee 37921


DAWLADDA TENNESSEE
DEGMADA KNOX

Aniga, Vonda Michael, anigoo si rasmi ah loogu dhaariyey sida uu sharcigu qabo, waxaan caddeynayaa in xaqiiqooyinka lagu xusay codsiga kor ku qoran ay yihiin run iyo sax inta ay ka ogtahay aqoontayda, macluumaadkayga, iyo aaminsanaantayda.


Vonda Michael, Maareeyaha Kiiska

Waxaa si rasmi ah la ii dhaariyey oo la ii saxiixay hortayda 15-ka Nofeembar, 2023.

DAWLADDA TENNESSEE
NOTAAYO GUUD
SUSAN TICE
DEGMADA KNOX



Xilliga Komishankaygu Dhamaanayo: 1-da Meey 2027.

OGEYSIIS KU SAABSAN RAFCAANKA LAGA QAADANAYO GO'AANKA LAGU JOOJINAYO XUQUUQDA WAALIDNIMO

Rafcaanka laga qaadanayo go'aanka kama dambaysta ah ee maxkamadda hoose ee la xiriira dacwadda ama codsiga lagu joojinayo xuquuqda waalidnimo waxaa lagu maamuli doonaa xeerarka ku cad Rule 8A, Tennessee Rules of Appellate Procedure, kaas oo xaddidaya waqtiyada gaarka ah ee loo qabtay gudbinta turjumaadda ama bayaanka caddeymaha, dhammaystirka iyo gudbinta diiwaanka rafcaanka, iyo gudbinta doodaha qoraalka ah ee maxkamadda rafcaanka, iyo sidoo kale qodob kale oo lagu dedejinayo habka rafcaanka. Dhammaan dhinacyadu waa in ay dib u eegaan Rule 8A, Tennessee Rules of Appellate Procedure, si ay u helaan macluumaad la xiriira xeerarka gaarka ah ee khuseeya rafcaanka kiiskan.

STATE OF TENNESSEE

Office of Vital Records

DAWLADDA TENNESSEE
Xafiiska Diiwaangelinta Dhalashada iyo Dhimashada

WAAXDA CAAFIMAADKA TENNESSEE
SHAHAADADA DHALASHADA NOOL

LAMBARKA DIWAANGELINTA DAWLADDA: 141-



ILMAHA	1. MAGACA ILMAHA (Koowaad, Dhexe, Dambe, Suffix) Stacy Mimo Niyizigama			
	2. JINSIGA Dhedig	3. TAARIKHDA DHALASHADA (Bil/Maalin/Sannad) 16 Disember 2014	4. WAQTIGA DHALASHADA 2:10 Galabnimo (PM)	5. MAGACA GOOBTA (Haddii aysan ahayn xarun rasmi ah, sheeg waddada iyo lambarka) Parkridge East Hospital
	6. MAGALADA, TUULADA AMA GOOBTA DHALASHADA Chattanooga			7. DEGMADA DHALASHADA Hamilton
HOODYADA	8a. MAGACA SHARCIGA AH EE HADA HOODYADA (Koowaad, Dhexe, Dambe, Suffix) Rose Niyizigama		8b. TAARIKHDA DHALASHADA (Bil/Maalin/Sannad) 1-da Janaayo, 1994	
	8c. MAGACA HOODYADA KA HOR GUURKEEDII UGU HORREEYAY (Koowaad, Dhexe, Dambe, Suffix) Rose Niyizigama		8d. GOOBTA DHALASHADA (Gobal, Dhul Hooseed, ama Dal Shisheeye) Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ah ee Kongo	
	9a. DEGMOOYINKA HOODYADA: GOBOL AMA DAL Tennessee		9b. DEGMADA Hamilton	
	9d. WADADA IYO LAMBARKA: 201 Eads St.		9e. LAMBAR GURIGA 425	9f. LAMBAR GURIGA 37412-0000
	9g. GUDAHA XADKA MAGAALADA? HAA		9c. MAGALADA, TUULADA AMA GOOBTA: Chattanooga	
10. CINWAANKA BOOSTADA EE HOODYADA ☒ La mid ah cinwaanka degaanka, ama				
Wadada iyo Lambarka Lambar Guriga Magaalo Gobo lama Dal Lambar Zip				
AABBAHA	11a. MAGACA SHARCIGA AH EE HADA AABBAHA (Koowaad, Dhexe, Dambe, Suffix)		11b. TAARIKHDA DHALASHADA (Bil/Maalin/Sannad)	
	11c. GOOBTA DHALASHADA (Gobal, Dhul Hooseed, ama Dal Shisheeye)			
SHAHAADO BIXIYE	12. SAXIIXA SHAHAADO BIXIYAHA IYO TAARIKHDA LA SHAHAADIYAY <i>Linda B. Smiddy</i>		18-kii Disember, 2014	
	SAXIIXA		TAARIKHDA LA SAXIIXAY (Bil/Maalin/Sannad)	
	XILKA: ☐ MD ☐ DO ☒ WAKIILKA ISBITAALKA ☐ CNM/CM ☐ CPM ☐ DHALIYE KALE ☐ KALE			
	Linda B. Smiddy MAGACA DAABACAN EE SHAHAADO BIXIYAHA			
13. SAXIIXA DIWAANGELIYAHA <i>Nepa B. Bello</i>		14. TAARIKHDA UU DIWAANGELIYAHA GALSIIYAY (Bil/Maalin/Sannad) 28-kii Disember, 2014		

Waxaan halkan ku caddeynayaa in kor ku xusan uu yahay nuqul sax ah oo dhab ah oo ka tarjumaya diiwaanka ama dokumentiga ku kaydsan waaxdan. Nuqulkan la shahaadeeyay wuxuu ansax yahay oo kaliya marka lagu daabaco warqad ammaan ah oo muujinaysa shaabbadda cas ee la xardhay ee Waaxda Caafimaadka ee Tennessee. Isbeddel ama masaxid waxay burinaysaa shahaadadan. Dib-u-soo-saaridda dokumentigan waa mamnuuc.

14416276

Tennessee Code Annotated 68-3-101 et seq., Vital Records Act of 1977

Edward G. Bishop III
Diwaangeliye Heer Dawladeed



Taariikhda La Soo Saaray: 11-ka Luulyo, 2022

CERTIFICATION OF VITAL RECORD

SHAHAADO DIIWAANKA MUHIIMKA AH



30-kii Oktoobar, 2023

DAWLADDA TENNESSEE
WAAXDA ADEEGYADA CARRUURTA
Cordell Hull Building, 8th Floor
436 Sixth Avenue North
Nashville, Tennessee 37243-1290

Codsi Ku Saabsan Magaca iyo/ama Cinwaanka Aabaha ama Ilmaha Aan Guur Ka Dhalan

CODSI:

Magaca Buuxa ee Ilmaha	Niyizigama, Stacy Mimo
Jinsiga Ilmaha	Dhedig
Magaca Buuxa ee Aabaha	Isse, Ahmed
Magaca Buuxa ee Hooyada	Niyizigama, Rose
Sababta Codsiga	TPR (Joojinta Xuquuqda Waalidnimo)
Magaca Qofka Codsanaya/	Waaxda Adeegyada Carruurta ee Tennessee
Hay'adda iyo Cinwaanka	2600 Western Ave Knoxville TN 37921

Taariikhda Codsiga	30-kii Oktoobar, 2023
Goobta Dhalashada	Knoxville, TN
Taariikhda Dhalashada Ilmaha	16-kii Disember, 2014

AABBAHA LA TUHUNSAN YAHAY:

Magaca Aabbaha La Tuhunsan Yahay

Cinwaanka Aabbaha La Tuhunsan Yahay

Taariikhda Diiwaangelinta // Taariikhda Isbedelka Cinwaanka La Diiwaangeliyay //

JAWAAB:

Taariikhda Jawaabta 30-kii Oktoobar, 2023

Diwaangeliye Shaqaalaha

Lambarka Telefoonka Diiwaanka 615-532-5637

Faallooyin:

Ma jiro qof soo gudbiyey ogeysiis niyadda uu ka qabo sheegashada aabbennimada ama aqoonsiga aabbennimada ee Stacy Mimo Niyizigama, Taariikhda Dhalashada: 16-kii Disember, 2014.

MAXKAMADDA DHALLINYARADA EE DEGMADA KNOX, TENNESSEE

**DAWLADDA TENNESSEE
WAAXDA ADEEGYADA CARRUURTA**

CODSADE

iyoo

**ROSE NIYIZIGAMA [Hooyada]
1205 Bonnyman Dr
Knoxville, TN 37921**

**ADOLPHE NTWARI [Aabbaha Brian]
Cinwaanka iyo Telefoonka Lama yaqaan**

**AHMED ISSE [Aabbaha Stacy]
Cinwaanka iyo Telefoonka Lama yaqaan**

**CHANTEL MUTEZINKA [Eedada Hooyada & Daryeelaha]
2209 Sutter Mill Ln
Knoxville, TN 37909
423-208-0421**

DACWOYYAASHA

KIISKA LA XIRIIRA:

Brian Mugisha, Taariikhda Dhalashada: 7-da Luulyo, 2010

Stacy Niyizigama, Taariikhda Dhalashada: 16-kii Disember, 2014

ILMO KAAS OO KAYAR SIDDEED IYO TOBAN (18) SANO

LA HELAY

24-kii Juun, 2022

Wuxuu Qaaday: ...

**XAQIJIIN
NUQUL SAX AH**

CHARLES D. SUSANO III

Xoghayaha Maxkamadda

Waxaa soo saaray: CS, 24-kii Juun, 2022

Ku-xigeenka Xoghayaha Maxkamadda

AMARKA XANNAANADA IYO DARYEELKA KMG AH

Iyadoo la tixraacayo xaqiiqooyinka lagu xusay codsiga dhaarta lagu xoojiyay ee lagu gudbiyay kiiskan,

Maxkamaddu waxay go'aamisay:

1. Maxkamaddan waxay leedahay awood sharciyeed oo ay ku maamusho dacwaddan, waana goobta dhagaysiga ku habboon Degmadan.

2. Waxaa jira sabab macquul ah oo lagu rumaysan karo in carruurta kor lagu xusay ay yihiin kuwo dhibaato la kulmay sida uu qeexayo T.C.A. § 37-1-102(b).
3. Ilmaha waxaa soo food saaray khatarta degdegga ah ee caafimaadkooda ama badqabkooda, taasoo ah heer ay suurtagal tahay in dib-u-dhigis loo sameeyo dhageysiga maxkamaddu ay sababto waxyeelo halis ah ama aan laga bogsan karin.
4. Ma jiro xal ka fudud ka saarista ilmaha oo si macquul ah u sugi kara caafimaadkooda iyo badqabkooda inta la sugayo dhageysiga maxkamadda.
5. Waa mid ka hor imanaya danaha ilmaha in ay sii joogaan guriga Chantel Mutezinka, sababaha ku cad codsiga maxkamadda awgood.
6. Iyada oo la tixraacayo Qaybaha II iyo III ee codsiga:
 - a. ☒ Dadaal macquul ah ayaa la sameeyay si looga hortago in ilmaha laga saaro guriga.

SIDAAS DARTEED, WAXAA LA AMRAY:

1. In Brian Mugisha iyo Stacy Niyizigama si rasmi ah loogu soo daro awoodda sharciyeed ee xannaanada iyo ilaalinta Maxkamaddan (protective jurisdiction).
2. In mas'uuliyadda sharci ee joogto ah ee carruurta kor ku xusan lagu wareejiyo Dawladda Tennessee, Waaxda Adeegyada Carruurta, laga bilaabo 24-kii Juun, 2022, ilaa amar dambe oo kasoo baxa Maxkamaddan.
3. In Waaxda Adeegyada Carruurta ay u hesho carruurtaas meeleyn iyo adeegyo ku habboon, lagana siiyo awood ay ku ogolaato dhammaan daryeelka caafimaad ee caadiga ah ama lagama maarmaanka ah, oo ay ka mid yihiin daryeel caafimaad, qalliin, adeeg isbitaal, waxbarasho, xarumo daryeel, daryeel dhimir ama cilmi-nafsi, inta laga helayo amar kale oo kasoo baxa Maxkamaddan.
4. In dhageysiga horudhaca ah ee kiiskan loo qabto 27-ka Juun, 2022, saacadu markay tahay 9:00 subaxnimo galabnimo, kuna dhici doona Maxkamadda Dhallinyarada ee Degmada Knox, oo ku taalla 3323 Division Street, Knoxville, Tennessee.

5. Haddii carruurta aan laga sii deynin daryeelka dawladda, waa in waalidiinta carruurta ay kasoo muuqdaan dhageysiga maxkamadda oo dhici doona 13-ka Sebtembar, 2022, saacadu markay tahay 9:00 subaxnimo (AM), kuna dhici doona Qaybta Taageerada Carruurta ee Maxkamaddan, si loo go'aamiyo awoodda waalid kasta uu ku bixin karo taageerada naf-lacaariga carruurta. Waalid kasta waa inuu keenaa dukumentiyoo muujinaya dakhliga hadda jira, oo ay ku jiraan xaashida mushaarka ee ugu dambeysay. Haddii waalidku uu ka baaqsado inuu kasoo muuqdo dhageysigan, waxaa laga yaabaa in maxkamaddu soo saarto xukun maqan.

6. In dhammaan hay'adaha dawladeed, kuwa degmo iyo gobol, ama hay'adaha maxalliga ah ee haysta macluumaad ama diiwaanno la xiriira xaaladda ilmaha, oo ay ku jiraan dhammaan xarumaha caafimaadka guud ama daryeelka dhimirka, kuwa dadweynaha iyo kuwa gaarka ah, iyo sidoo kale dhammaan goobaha waxbarashada, ay siidaayaan macluumaadka ama diiwaannada lagama maarmaanka u ah maaraynta kiiskan, iyagoo u gudbinaya Waaxda Adeegyada Carruurta iyo wakiilladeeda.

7. Waxaa sii dheer, waxaa la amray

WAXAA LA GALIYAY 24-kii Juun, 2022,

saacadu markay tahay 4:06 subaxnimo/galabnimo (AM/PM).


GARYAQAAN/GARSOORE KMG AH

WAXAA DIYAARIYAY:


Elizabeth Smith, BPR #016913
Qareen Wadaag
Waaxda Adeegyada Carruurta
2600 Western Ave
Knoxville, TN 37921